

Hordhac

Allaah ayaa mahad iska leh I waafajiyay qorista buugan muhiimadda uleh bulshada soomaliyeed, gaar ahaan dhalinyarada dooneysa inay dhisaan nidaam hormar leh.

Buugan oo aan kumagacaabay “sidee loo dhisa nidaam?” waxaad kafa’iideysan doontaan sidii loo heli lahaay ururo iyo kooxo hormariya dalkeena hooyo lehna qiirad wadaniyad, Cadaalad iyo horu-socod.

Soomaaliya waa dal ubaahan Daacadnimo iyo dadaal maxaa yeelay soomaaliya tiri: “Dal kasta dadkiisaa dhista” qof kasta waxaa kuguwaajib ah inaad qabato haba yaraatee howl muhiim u ah dalkeena si caruurtaadu ugu raaxeysato hormar iyo inay kugu xusuustaan Daacadnimo dalkana aad kagasho baal dahab ah sidii halgamayaashii dalka kaxoreeyay gumeestihii dulliga ahaa.

Agristeyaasha sharafta lehoow waxaan ahay inaan ama banii aadam waxaana suurtagal ah inaan wax-qaldan qoro maadaama macnaha (inaan: uu tilmaamayo inaan wax halmaami karno) sidaas awgeed waxaa dhameystiran rabbigii na abuurtay, waxaana idinka codsanayaa inaad iga cafisaan wixii gaf ah oo aad aragtaan.

Dhis nidaam

Sidaan horay usoo sheegnay dalkani wuxuu baahi-weyn uqabaa Daacadnimo adeegta oo shacbiga katimaada iyo nidaam hormar leh oo shacabku ay lashaqeeyaan una dhiibtaan kalsoonidooda, waxaana markasta muhim ah in dhalinyaradu noqoto Hogaanka shacabka.

sidaas darteed wax kasta ee ladhisayaa waxay ubaahanyihiin hadabaaynu bilaawno shaqada:

Qodobka 1aad

kadhig Nidaamka aad dhiseyso mid bulshada aan wax udhimin lehna faa’iido guud adoo dib udhigaya danta gaar ahaaned.

markaad danta guud oo ah danta dadka iyo dalka aad soo hormariso waxaad heleysaa dantaadii gaar ahaaneed si dhameystiran ayaad uheleysaa maadaama aad wadanka xuquuq kuleedahay.

Taas cagsigeed hadii aad is dhahdo yaysan kudhaafin dantaada gaar ahaaneed hadaba waxaad ogaataa waji-xumo ayaad kakasbatay shacbiga dhexdiisa dantaadiina inaad gaartana way adkaaneysaan hadaad gaartana liis madoow ayaad kagaleysaa dadweynaha qalbigooda, waxaana Qatar ah inaad ilaahey xagiisana kanoqoto qof khaa'in ah.

Qodobka 2aad

Kadhig Nidaamka aad dhiseyso mid kusaleysan Daacadnimo, Cadaalad iyo sinnaan, eex la'aan iyo inaad kafogaato qabyaalad, waji garad iyo goboleysi.

markii aad bulsho u adeegeyso waxaa mamnuuc kaa ah eex, Cadaalad daro iyo wixii lamida, sidaan kaqaadaneeno diinteena islaamka ee suuban waxay ina fareysaa: inaan kafogaano wax kastoo umadda islaamka ah dhib ku ah ayadoo wax kastoo lasameynayo loo eegayo diinta islaamka.

sidaa adinkuba ku aragteen axaadiista rasuulkeenna (SCW) hogaamiyaha caadilka ah wuxuu ilaahey agtiisa ka helaa abaal-marin wanaagsan ayadoo rabbi (sw) uu geeyn doono carshiga hoostiisa kana soo dhex-saarayo dadka ay qoraxdu si weyn ugu dhibaateysan macalinka qiyaamaha, taas mid lamid ah ayuu bulshadana wuxuu kahelayaa taageero lashaqeyn ah.

hadii aad tahay Hogaamiye urur, mid kooxeed mid dowladeed, mid xaafadeed ama aad jago uun hayso kudadaal inaad ilaahey agtiisa kahesho darajo sareysa.

Hadii aysan dhicin sidaas maxaa dhacaya?

hogaamiyihii aan yeelan tilmaamahan wanaagsan waxaa loobixiyaa magacyo xun-xun oo ah "maakir" oo ah dhagarrow iyo "Cadaalad-laawe" allaah agtiisa Qatar ayuu kujiraa qofkaasi bulshaduna way nacdaa ugu danbeyn waa uu guul darreystaa, waayaabe magacyadani sharaf wanaagsan maahane aan iska ilaalinno walaalayaal.

Qodobka 3aad

Kadhig Nidaamka aad dhiseyso mid xubnihiisay xul yihiin luguna xushay astaamaha suurtagalka ah in nidaamkaasi uu hormar kugaaro ayadoo shay kasta loo hormarinayo Cadaalad, diin-wanaagsan, sinnaan iyo eex la'aan.

markaad nidaam dhisi rabto waxaa lama huraan ah si nidaamkaasi u guuleysto inaad xubno xul ah ku aasaasto kuwaasoo leh tilmaamaha lagu hogaamin karo nidaamkaas (bulsho).

Balse hadii aadan raacin wadadaas oo aad adeegsato aalada lagu magacaabo: qof-jecleysi, eex iyo kaligi-talishimo waxaan hubaa iney soo deg-degeyso bur-bur baahsan oo waqti aan lafileyn dhaca ayadoo aan kaxumahay in nidaamkaasi uusan dib ucuran Karin sababtoo ah bulshadu waxay umaleyn kartaa inuu markale bur-buri doono mana heleyo wax taageero, sidaas awgeed hadhisin nidaam bulshada anfacaya hadii aadan socodsiin karin.

Qodbk 4aad

markaad nidaam dhiseyso waxaa muhiim inaad kafekerto kartida uu lahaankaro Nidaamka aad dhiseyso iyo bulshada baahideeda iyo nooca wax-qabad ee bulshadu ubaahantahay adigoo adeegsanayo wada tashi iyo xog aruurin markaas waxaad fahmeysaa nooca wax-qabad oo bulshadu ubaahantahay.

Qodobka 5aad

waxaad hadaba xulataay nidaamkii aad dhisi lahayd oo aad bulshada kuhormarin lahayd.

Mar hadaad dooratay Hirgalinta barnaamij awoodaadu la'egtahay inaad qabato, bilaaw dhismihii ururka adigoo kaqeyb galinaya aasaasidda ugu yaraan dad aan badneyn oo aad ogtahay waxqabadkood oo aad sugnaanshohooda kukalsoontahay.

Diyaarso profile oo ah hab raacaaga shaqada, sidoo kale diyaari dastuur ururku kushaqeeyo adigoo kooxda katalo galinaya diyaarinta Dastuurka

NB: waxaad ogaataa dastuurkii aad hada qorato waa waxaad beri kudhaqmi lahayd ee iska tirxaan-bixi intaadnaan ansixin, markasta oo aad dastuur usameyn rabto urur ama koox waa inaan sal-dhig uga dhigtaa diinta islaamka.

kooxdiiinaan wax dhistay waxaad ururka kudhex yeelaneysaan sumcad, awood baaxad leh iyo waji, waxaana loo yaqaan magaciina "aasaaseyaal".

Isla markiiba kudadaal inaad dhidibada aad usurtid ururka, si aadan unoqon qof wax dhisay oo dhib sookordhiyay ama

intuu wax dhisay caajisay, maxaa yeelay intaad wax dhiisto hadaad caajisto mustaqbalkaaga saameyn ayay arintani kureebidoontaa, waxaana adkaaneysa inaad mustaqbal guul leh gaartid dadkuna wax aad dhistid ama aad kamid tahay mar dambe ma'aaminayaan.

Dejiso istraatiijiyadii ururku kusii noolaan lahaa oo uu kuyeelan lahaa cimri dheer oo waaraya mudo dheer, balse hadaadan leheyn istaraatiijiyad wanaagsan waxaad noqoneysaa reer guuraa uguuraya meel aysan soo sahmin.

Qodobka 6aad

Ururka aad dhisesid waxaad dareemi kartaa inuu yahay nidaam saameynaya bulshada, mar hadaad sidaas ogtahay waxaa kugu waajibaya inaad bulshadaas wanaag iyo hormar aad u horseedo.

Markaad urur dhiseysid maahan wax sahlan mana lafududeysan karo, waa inaad si daganaan iyo dulqaad ah uguda gashaa howsha adiga marka koowaad kubilaabaya magaca ururku yeelan lahaa adigoo kusaleynaya waxa aad qaban doonto.

Iska fiiri magaca aad qaadaneyso inuu yahay mid lahaysto iyo in kale adigoo in badan adeegsanayo internet-ka, hadii ay dad haystaan haqaadan maxaa yeelay waxaa lagayaabaa inay maxkamad kula tiigsadaan.

Balse hadii dadka iska leh magaca ay kusiiyaan iska hubi intaadan qaadan oo degdegta jooji hana fududaan, waxaa laga yaabaa inuu yahay magac kafashilmay oo guul-darreystay ama dad looga galay qalad, lakiin hadii uu horay usoo guuleystay oo ay uga tageen magacani inuu shaqeyn waayay xilligan sababtoo ah baahida shacabka ay uqabaan ayaa yaraatay, kaasna haqaadan hadaad hormar doon tahay.

Markaad magac sax ah oo aan luguugug haysan aad sameysato kuxiji sameysiga loogo ama waxa loo yaqaan astaan, sidaan horay idinkugu soo sheegay waxaa kuu muhiim ah bulsho kula shaqeeyso oo aad kutiirsantahay, si aad uhesho bulsho farabadan waa inaad loogada ururkaaga kadhigtaa mid qurux iyo bilic badan, oo indhaha dadweynaha soo jiidaneysa.

looga markaad sameyn rabto xulo nooca loogo ee ad rabto, waa in looga ururka ay kamuugataa haybad ururnimo iyo sharafeed, waxaa sidaas oo kale waajib ah in loogada dhexdeeda ama muuqaalkeedu muujinayo waxa ururku uu

qaban doono miitaal hadaad tahay urur waxbarasho waa in agab tacliin ay loogada kamuuqdaan sida: qalin, buug, iftiin I.W.M.

markaad Intaas faaruqdid sameyso halkudhig ama hal-qabsi, hadaan kuu miitaaliyo “Baabi’i” ama “hormari dhalinyarada” kuwani wa miitaal ee adigu ururkaaga halqabsi kuhabboon usameey.

Marka xigta bilaaw inaad qorto hordhacii profile-ka adigoo adeegsanayo erayo kuqumman wax-qabadka ururkaaga, intaad hordhaca qoreysid kuxus taariikhda la’aasaasay ururka.

Markaas qortid Intaas kuxiji (VISION) oo ah Aragtida fog ee ururka leeyahay waxaadna uga faalooneysaa ururku waxyaabaha uu hiigsanayo Mustaqbalka fog, iyo rajjada ururku uu qabo inuu gaaro.

markaas kadib qor (mission) oo ah howl-galka ururka, mowduucaas dhexdiisa ayaa waxaa lagaa donayaa inaad kufalanqeyso waxaad qabataan ama qabaneysaan urur ahaansi dadku u arkaan Barnaamijka aad kuhowllantihiin.

Markaad qortid qodobada aan kor kusoo xusnay waxaa kuu dhiman mowduucyo kale oo isla profile-ka dhexdiisa lagu qori doona, midkan ayaad kuxijineysaa (objectives) oo ah ahdaafta ururku leeyahay.

Muhimadda badankeedii waa ay kuugacan gashay waxaad raacisaa (organizational structure) oo ah qaab-dhismeedka ururka iyo sida masuuliyiintu iyo xubnuhu ukala sarreeyaan adigoo sawir ama qoraal kumuujinaya.

Si loo fahmo Qaabka dhaqaaluhu kuusoo galo qor (organization finance) oo ah faafaahin kuşaabsan dhaqaalaha ururka, mowduucan waxaad inooga sheekeysaa dhaqaalaha ururkaaga.

Marka aad soo gaban gabeyneyso qormada ama diyaarinta profile-ka qor (contacts) oo ah halka lagala soo xiriiri lahaa ururka, halka ugu faalloo goobaha iyo meelaha la’idinkala soo xiriiri karo hadii ay tahay xafiiskiina, taleefoonadiina iyo emailadiina.

Maxaa xigaya?

Mar hadaad faaruqday qoristii iyo diyaarintii profile-kiina waxaa kugu waajibaya inaad diyaariso dastuur ururku ku

hagayo howlihiisa shaqo.

Markaad dastuur dajinaysid waxaad ogaataa in loo baahanyahay dad caaqiliin ah oo aqoon iyo qibrad uleh diyaarinta dastuur, kuwaasoo kafog maandooriye wax kastoo caafimaadka wax udhimi kara.

Waxaadna xasuusnaataa Dastuurka aad hada gorato inuu yahay kii horay usocod idin keeni lahaa ama dib udhac inku sababi lahaay.

Hadana waxaa lasoo gaaray waqtigii aan howsha bilaabideeda idinka dhex bixi lahaa, si aanan idinkugu mashquulin sheeko micno darro ah guda-gala oo hawsha billaaba mudaneyaal iyo marwooyin.

waxaana idinkumaca salaameynayaa inay soomaaliya tahay dal qani ah oo ka deeqtoon dunida markasta qeyraadkeena xaalifisa, annaguna aan tuugsanno.

GUNTA IYO GUNAANADKA

Faallo kusaabsan dalkeena hooyo

Dalkii ugu horreeyay oo afrikaan ah oo ingriisku diyaarad kuduqeeyo wa somaliya waana iska dulqaadnay dulligii gumeystahaas.

Madaxweynihii ugu horreeyay ee soomaaliya waa aadan c/lle cismaan (aadan cadde).

Dalkeenna soomaaliya waxaa uhalgamay halyaayaal naftooda huray ayadoo 1960 aan qaadannay xuriyada.

Ninkii ugu horreeyay ee soomaali ah oo kaqudbeeya qamada midobeey uu (c/llaahi ciise maxamuud).

Federalku waxa uu uroonyahay wadamada ay daganyihiin dadka leh luqadaha, iyo jinsiyadaha kala duwan, ayadoo soomaaliya aytahay dad isku diin isku luqad iyo isku jinsi ah mana filayo in federalku xal unoqonayo dalkeena hooyo.

balse waxaa Qatar in dowladaha dariska ah ay gacanta
kudhigaan dhulkii xurriyadiisa dhiig badani kubaxay, ayadoo
hada ay muuqato in itoobiya ay faraha kula jirto gobollada
qaarkood iyo waliba guud ahaan siyaasada dalkeena.....
ALLOW RABIYOOW NOO GAR-GAAR

MAHADSANIDIIN

Xuquuqda buugan waxay udhawrsantahay:

Qoraaga da'da yar:

C/qadir Cali Cabdi (MIDEEYE)